



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Digaag iyo hangaraarac

Skriven av: Winny Asara

Illustrerad av: Magriet Brink

Översatt av: Abdi Muse


Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<http://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 3.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv>


Digaag iyo hangaraarac




✎ Winny Asara
🔒 Magriet Brink
📄 Abdi Muse
😊 somaliska
|| nivå 3

(utan bilder)





Digaag iyo Dixiri waxay ahaayeen saaxiibo. Laakiin had iyo jeer waxay ahaayeen kuwo tartamo. Hal maalin waxay go'aansadeen inay ciyaaraan kubadda cagta si ay u arkaan midka ah ciyaaryahanka ugu fiican.




Wayay aadeen garoonka kubada cagta
waxayna bilaabeen ciyaartooda. Digaaqadu
waxay ahayd mid dhakhso badan, laakiin
hangararaca ayaa kasii dhakhso badnaa.
Digaaqadu waxay u darbaysay meel fog
laakiin hangararaci ayaa u darbeyay meel
kasii fog. Digaaqadu waxay bilaawday inay
dareento xanaaq.




Waxay go'aansadeen in ay ciyaaraan gool ku laad. Waxaa goolhaye ku hormaray hangaraarici. Digaagtii waxay dhalisay hal gool oo kaliya. Kadibna waxay ahayd digaaggada markeedi in ay difaacdo goolka.



Laga soo bilaabo wakhtigaas, digaagga iyo hangaraacyaasha waxay is ku ahaayeen cadow.




Hangaraarici wuu darbeeyay kubadii waa uu na dhaliyay. Hangaraarici ayaa soo ceeyriyay kubada wuuna dhaliyay. Hangaraaraci ayaa madaxa ku soo tuuray kubada wuuna dhaliyay. Hangaraarici waxa uu dhaliyay shan gool.




Digaaggadii waa ay qufacday ilaa ay qufacday Hangaraarici ku jiray caloosheeda. Hooyadii hangaraaraca iyo ilmaheedi waxay ku guurguurteen geed korkiisa si ay iskugu qariyaan.




Digaaggadu waxay ka cadhootay in ay guuldareysatay. Waxay ahayd kuuldareyste aad u xun. Hangaraarac waxuu bilaabay in uu qoslo sababtoo ah saaxiibkiisa ayaa ahaa mid sidaas u buuqa.




Digaaggadu waa aay daacsatay. Kadibna way liqday oo candhuuf tuftay. Kadibna way hindhistay oo qufacday. Oo qufacday. Hangaraaricii waxuu ahaa karaahiyo!



Digaagadii aad ayay u xanaaqday oo
waxay aad ukala qaaday afkeedi waxayna
liqday hangararicii.



Hooyadii Hangararaca ayaa ku qayilsay,
"Isticmaal awooddaada khasaka ah
cunugeyga!" Hangararacayasha waxay
samayn karaan shir xun iyo dhadhan
daran. Digaagadii waxay bilaawday in ay
darento xanuun.



Iyadoo digaaggadi u soo socotay guriga, waxay la kulantay hangaraarac hooyadii. Hangaraarac hooyadii baa waydiisay, “Ma aragtay ilmahaygi?” Digaagada waxbo maysan odhan. Hooyadii Hangaraaraca ayaa walwashay.



Kadibna Hooyadii Hangaraaraca waxay maqashay cod aad u yar. “Hooyo i caawi!” ayuu ku dhawaaqay codka. Hooyadii Hangaraarac waxay fiirisay agagaarka oo dhageysatay si taxaddar leh. Codka ayaa ka yimid digaaggada dhexdeeda.